

Jamaacada Al-ictisaam oo Madaxda dhaqaka u jeedisay baaq ku saabsan xulista xubnaha Baarlamaanka

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ
الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ، وَالصَّلَاةُ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِهِ وَاصْحَابِهِ

Waxgaradka Soomaaliyed waxaa diinta, dalka iyo dadka ka saaran xilweyn oo Ilahay hortiisa la weydiin doono. Haddaba Jamaacada Al-ictisaam bil kitaabi wassunnah iyada oo dareensan xilkaas, isla markaasna gudanaysa waajibka naseexada waxay baaqaan u jeedinaysaa madaxda dhaqanka Soomaaliyed:

1. Wax ku qaybsiga nidaamka beelihu wuxuu si gaara dusha idiinka saaray xilka soo xulista xubnaha baarlamaanka, taas oo masuuliyaddii idinku sii cuslaynaysa; waayo waxaad xulaysaan ciddii ka arrimin lahayd aayaha ummadda , soona dooran lahayd hoggaamiyaha dalka. Haddaba ummadda u doora dad xilkaas weyn gudan kara.
2. Xil weyn oo Ilahay horti la idin weydiin doono ayaa idin saaran ee xulashadiiu ha noqoto mid aad Alle ajar kaga heshaan, ummadda iyo beelaha aad matalaysaana idinku mahadiyaan ee yaanay noqon mid idinka dambi idiinka yimaado, waadna wada ogtihiin in aan la ogolayn in xil loo magacaabo nin ay joogaan dad kaga habboon jagadaas iyo inaad wax ku yeelanaysaan dadka aad soo xushaan waxay gaystaan khayr iyo sharba.
3. Beel walba xubnimada baarlamaanka waxaa u taagan tiro aad uga badan xubnaha la siiyey. Taa macneheedu waa inay idin eedayn doonaan ragga wax waayey iyo taageerayaashooduba. Haddaba haddii aydناan marna eed la'aanayn ha isku darsanina eedda dadkaas iyo mid aad Ilahay ka gashaan ee Rabbigii raali galiya, ummadda aad matalaysaana tixgaliya.
4. Waa in la sameeyo halbeeg (tilmaamo iyo shuruud) dadka lagu kala xulo. Ragga shuruudaha soo wada buuxiyeyna waa in loo sameeyo wax lagu kala reebo, sida Saamiga (qorituur) iwm. Haddii kale nin walba waxay la noqon inuu isagu mudanyahay. Haddii wax la siin waayana wuxuu u fasirayaa in si kale wax loogu diiday. Waliba halbeeggaas waa inaad beelaha wada gaarsiisaan inta aydناan xubnaha soo xulin. Dhinaca kale waa in laga gudbo marxaladdii madaxda lagu soo xulan jirey qabqabanimada ee beel walba ha isku daydo inay tusaale wanaagsan ugu noqoto beelaha kale.
5. Beel kasta waa jifoojin fara badan, mana la hayo xubno jifoojinka u wada qaybsama, jifadii wax la siiyana lafteeeda ayaa sii kala baxaysa. Haddaba waxaa habboon xubintii jifoojin soo dhixmarta in la siiyo qoladii ugu musharax fiicnaata; si qolo walba usoo hormariso ninka ugu fiican.
6. Tilmaamaha iyo shuruudaha xubnaha lagu soo xulayo waxaa ka mid noqon kara: inuu yahay nin diin iyo akhlaaq leh, una taagan ku dhaqanka shareecada islaamka; waayo ninka xaqa Alle iyo xaqa naftiisa gabay laga fili maayo inuu ummadda xaqeeda u gudo, beesha uu matalayana wuxuu u soo jiidayaa eed iyo sumcad xumo, waana inuu leeyahay aqoon sare oo ah PHD ama ugu yaraan Master degree, diinta iyo dhaqanka bulshadana uu aqoon wacan u leeyahay, laguna yaqaan ra'y iyo waaya-aragnimo siyaasadeed iyo maamul.

Waxaa kale oo laga eegayaa kartida, firfircoonda, isku kalsoonida iyo waxqabadka, waxaana lagu ogaan karaa sida uu ugu guulaystay xilalkii uu horay u soo qabtay, waana inuu bulshada sumcad ku dhix

leeyahay, laguna yaqaan ka shaqaynta danta beeshiisa iyo tan guud ee ummadda ee aanu noqon nin taariikhdiisu madowdahay tolka dhexdiisa ama ummadda dhexdeeda, uuna ka caafimaad qabo isticmaalka daroogada; si aanu ummadda mustaqbalkeeda marduuf ugu iibsan!!.

7. Ninka galaya baarlamaanka ama qabanaya xilalka guud waa inuu yahay qof u qalma karti ahaan iyo amaano ahaan, ujeeddadiisuna tahay inuu diinta iyo ummadda u adeego. Ninkii aan timaamahaas lahayn uma bannaana inuu isagu galo ama loo dhiibo oo dambi loogu kaalmeyo; sidaa darteed waa inaan beeluhu ku cadaadin madax dhaqameedkooda wax aan Ilahay raalli ka ahayn, ummaddana dan u ahayn.

Ilaahay towfiiqda ha ina waafajiyo ... Aamiin

*Golaha fulinta
ee Jamaacada Al-ictisaam Bilkitaabi Wassunnah*